



## Qorshaha Samatabixinta Maraykanka (American Rescue Plan) Waxa uu hoos u dhigaa qiimaha Caymiska Caafimaadka dadka degan New York

NY State of Health waxa uu kaa caawin karaa inaad fahanto kaalmada dhaqaalaha ee cusub, aadna cusbooneysiiso cadadka amaahdaada canshuurta, iyo inaad wax ku iibsato iyo sidoo kale inaad doorato qorshe caafimaad.

### La xariir Laanta NY State of Health



Oonleen ahaan ugala xariir: [nystateofhealth.ny.gov](https://nystateofhealth.ny.gov)



Wac Xarunta Adeega Macmiilka oo lambarkoodu yahay: 1-855-355-5777  
(TTY:1-800-662-1220)



Caawimaad bilaash ah ka hel Caawiyaha Isdiiwangelinta. Ka raadi mid: [info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor](https://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor)

*Si aad wax badan oga barato American Rescue Plan, fadlan booqo: <https://info.nystateofhealth.ny.gov/AmericanRescuePlan>*

### Fahanka Kaalmada Dhaqaale ee Cusub

- American Rescue Plan waxaa la saxiixay oo sharciga la marsiiyay Maarso 11, 2021. Waxaa kamid ah kaalmo dhaqaale oo cusub sidoo kalena balaaran oo la siinaayo dadka reer New York ee ka diiwaangashan caymiska caafimaadka ee lagu bixiyo NY State of Health.
- Kaalmadaan dhaqaale waxaa heli kara **dadka horey oga diiwaangashanaa iyo kuwa hadda iska diiwaangeliya**, oo ay kujiraan **dadka dakhligooda aadka u sareeyo markii ugu horeysay**.
- Dhibcaha waawayn ee canshuurta waxaa hadda **heli kara** dadka degan New York ee hela dakhliga dhexdhexaadka ah iyo kuwa dakhligoodu yar yahay. Shaqsiyaaadka, kani waa dakhli gaaraya illaa \$51,040 halkii sanaba. Qoysaska ka kooban afar qof, kani waa dakhli gaaraya illaa \$104,800 halkii sanaba.
- Laga bilaabo **Juun**, dadka reer New York waxay heli doonaan dhibcaha canshuurta ee cusub gaar ahaan kuwa dakhligoodu ka sareeyo tiradaas.
- Fiiro gaar ah u yeelo ogeysiisyada iyo iimeelada ay soodirto laanta NY State of Health oo ay kugula socod siinayso goorta isbadeladaas dhaceen iyo waxa ay tahay inaad sameyso.

NY State of Health waxay u hoggaansantaa sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabihi karo iyo sharciyada gobolka, waxna kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, naafada, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, xaalada dhibanaha gabood falka guriga iyo/ama aargoosiga.

## American Rescue Plan

# Waxa uu hoos u dhigaa Caymiska Caafimaadka dadka reer New York

## Waxa ay tahay Inaad Sameyso:

### **Haddii aad horey iskaga diiwaangelisay qorshaha adoo u maray NY State of Health aadna heshay kaalmo dhaqaale:**

- Waxaad hadda u qalantaa kaalmo dhaqaale oo dheeraad ah.
- NY State of Health waxay billoowga Abriil soodiri doontaa waraaqa ay ku qoran yihiin qiimaha dhibcaha canshuurta cusub, ee aad u balaaran. Raac tilmaamaha ku qoran warqada si aad u cusbooneysiiso qiimaha lacagta aad ka jarayso canshuurtaada.
- Haddii aadan cusbooneysiin qiimaha canshuurtaada marka la gaaro Juun, NY State of Health si ootamaatig ah ayay ugu kordhineysaa. Waxaad heli doontaa fursad aad ku sameyso isbadel adoo gelaaya akoonkaaga NY State of Health, la xariir qofka kaa caawinaaya isdiiwaangelinta, ama wac 1-855-355-5777.

### **Haddii aad billoowday codsiga NY State of Health laakiin aadan iska diiwaangelin qorshaha caafimaadka:**

- Haddii lagu sheegay inaad u qalanto kaalmada dhaqaalaha, hadda waxay u badan tahay inaad heli doonto kaalmo dheeraad ah. Hadda dib u gal akoonkaaga NY State of Health kadibna fiiri inaad u qalanto canshuur celin badan, kadibna u adeego oo dooro qorshe.
- Haddii horey laguugu sheegay inaad u qalmin kaalmada dhaqaalaha, waxaa laga yabaa inaad hadda u qalanto. Dib u gal akoonkaaga NY State of Health bisha Juun kadibna fiiri inaad u qalanto canshuur celin badan, kadibna u adeego oo dooro qorshe.

### **Haddii aad mar horeba ka diiwaangashan tahay qorshaha NY State of Health aadana helin kaalmo dhaqaale:**

- Waxaad hadda u qalmi kartaa dhibco canshuur celin oo aad u balaaran.
- Dhibcaha canshuur celintaas waxaa la heli karaa marka laga bilaabo Juun. NY State of Health waxay kuusoo diri doontaa warqad ay ku sheegayso qiimaha dhibcaha canshuur celintaada. Macluumaad ku saabsan sida loo codsado dhibcaha canshuur ka dhaafitaanka waxaa laga heli doonaa <https://info.nystateofhealth.ny.gov/AmericanRescuePlan>

### **Haddii aadan horey iskaga diiwaangelin qorshaha adoo u maraaya NY State of Health aadana bilaabin codsi:**

- Hadda ka codso [nystateofhealth.ny.gov](https://nystateofhealth.ny.gov) si aad u hesho waxa aad u qalanto. Inta badan dadka reer New York waxay u qalmaan caymis bilaasha h ama qiimo jaban. Kaalmada dhaqaale ee la balaariyay ayaa hadda heli kartaa haddii aad hesho dakhli dhexdhexaad ah ama mid hoose (dakhli dhan illaa \$51,040 sanadkiiba shaqsiyaadka ah, ama dakhli dhan illaa \$104,800 sanadkiiba qoys ka kooban afar qof).
- Haddii aad haysto dakhli badan (oo ka badan \$51,040 sanadkiiba shaqsigii, ama in ka badan \$104,800 sanadkiiba qoys ka kooban afar qof), gunnooyinkaas waxaa laga heli doonaa NY State of Health laga bilaabo Juun.